# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



# Nimankii Aan Leexan

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Jonathan Hay


Waxa dhaqan-geliyay: Mary-Anne S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Boqor Nebukadnesar wuxuu dhisay oo sameeyey ekaan dahab oo aad u weyn, tan madax ilaa cirib. Lagayaabee inuu boqorku ilaabay riyiadii Ilaah u sheegay isaga boqortooyadiisa dahabiga ah inaysan weligeed dhamaanayn. Malaha wuxuu is yidhi haddii uu taallo dahab ka samaysan oo dhammi ka samaysan yahay, markaas Erayga Ilaahay ee riyadiisa ma rumoobayn doono.



Mid ka mid ahaa addoomihii boqorka ayaa akhriyey ama naadieyey amarkii la siiyey. "—Waa inaad u sujuudaan oo caabuddaan ekaanta dahabka ah... oo ku alla kii aan u sujuudin oo aan caabudin waxaa algu dhex tuuri doonaa foorno dab ah."



Qofwalba wuu sameeyey wixii boqorka ku amaray – saddex nin mooyaane. Saddexdan nin cibraaniyiiin bay ahayeen. Waxyna kala ahaayeen Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow, saaxiibadii Daanyeel, saaxiibadii Daanyeel.



Waxayse u ektahay kolkaa iyada ah inuusan meeshaa joogin Daanyel, waase la hubaa ghasddii uu joogi lahaa inuu diidi lahaa sanam inuu caabudo.



Xigmadlayaashii boqorka aad bay uga hinaaseen Daanyeel iyo saaxibadii sababta oo ah boqorka ayaa jeclaa iyaga. Kolkaa bay waxay yidhaahdeen, “Waxaa jira kuwa yuhuud ah oo u dooratay inay axwaalkii gobolka Baabuloo u taliyaanwaana Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow. Haddaba boqorow nimankaai dan kaama ay lahayn, iyagu uma adeegaan ilaahyadaada umana sujuudaan ekaanta dahabaka ah oo aad qotimisay.”





Markaasaa boqor Nebukadnesar intuu dhirfay oo aad u cadhooday. Wuxuuna u digay iyagii, "Haddaad u sujuudi weydaan isla saacadda waxaa la idinku dhex tuuri doonaa foornada dabka oo ololeysa. Kolkaas waa ayo ilaaha gacantayda idinka badbaadin doona."


Boqrkii khalad weyn buu sameeyey.  Wuxuu isku dhereriya oo uu ka horyimid Ilaaha nool.  Saddexdan nine e cibraaniyiinta ah way ogaayeen inay ka soo horjeedo sharciga Ilaah in la caabudo ekaanta sanamkan.  Meeshoodiibayna ku adkaysteen oo istaageen.  Sababta oo ah waxay rumeysnaayeen Ilaah, oo ma aysan ka cabsaanyn boqorka.



Saddexan nine e geesiyiinta ah jawaab bay u hayeen boqorka. Waxayna ku yidhaahdeen, "Ilaahayaga aan u adeegno waa awoodaa inuu naga samata bixin doonaa gacantaada, boqorow. Laakiinse haddaanay ahayn, Boqorow, ogow inaannan u adeegayn ilaahyadaada, una sujuudin ekaanta dahabka ah oo aad qotomisay."



Boqor Nebukadnesr aad buu u cadhooday! Wuxuuna amar ku bixiyey in dabka foornada aad loo sii qixiyo oo la kulayliyo kulkeeda ilaa todoba jeer in ka heerkulka caadiga ah.  Weli nimankii ma aysan jilba joogsan.



Boqrku wuxuu amray niman xoog badan oo ciidnkiisa ku jiray inay sidhxidhaan Sahdrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednego oo ay ku dhex

tuuraan foornada dabka ah nee ololeysa.



Foornadana aad iyo aad bay u kululayd oo nimankii baa lagu dhex tuuray Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow kulaylka dabku inuu dilo.



Boqorku wuu ka daawanayay meel fogaan badqab ah.  Wuxuuna arkayay saddexdii nin oo lagu dhex tuurayo foornad ololka dabka ka baxayay. Laakiinse taasi keliya ma aysan ahayn wuxuu arkay.



Boqor Nebukadnesar wuu yaabau! "Miyaynaan saddexda nin ee xidhxidhan dabka ku dhex ridin?" wuxuu weyddiiyey caawiyayaashiisii.



Markasay u jawabeen oo ku yidhaahdeen "Haa! Bal eeg waxaan arkaa afar nin oo furan, oo dabka ku dhex socda, ee aan waxyeelo gaarin, oo midka afaraad soojedkiisa wxuuu u eg yahay mid ka mid ah Wiilasha Ilaahyada!"



Wuxuu ag yimid foornadii dabka ahayd oo ololeysa afkeedii, oo intuu hadlay buu yidhi. "Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow, Ilaaha ugu sareeya addoomadiisow, soo baxa oo hakan kaalaya!" deedna Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow, baa ka soobaxay foornadii dabaka ahayd ee ololeysay.



Cidwalba oo meeshii joogtay baa ku soo ururay hareerahoodii si ay bal u eegaan saddex nin e Cibraaniyiinta. Waxay arkeen inaan dabku lahayn awood uu ku gubo. Timahoodu ma guban, dharkooduna ma gubin. Xataa ma urkooda dabku ma lahayn.



Markii uu hubsaday waxa dhacay, boqor Nebukadnesar waxuu sameeyey inyaroo caqlicali ah. Wuu tukuday oo yidhi, “Mahad waxaa leh Ilaaha Shadrak, iyo Meeshak, iyo Cabeednegoow, oo u soo diray malaaigtiisa, oo badbaadiyeye addoomadiisa isaga isku halleeyey Isaga.”



Nimankii Aan Leexan

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Daanyeel 3

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16